LA CUSBOONAYSIIYAY Maarso 15, 2017-ka

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay cusboonaysiindoontaa isla markaana joogtayndoontaa liiska su'aalaha iyo jawaabaha inta badan la isweydiiyo ee ku saabsan tayada biyaha ee dugsiyadeena. Su'aalaha waxaa lagu gudbin karaa pubinfo@pps.net.

## Saamaynta Caafimaad ee Kiimikada Lead ee ku jirta Biyaha la Cabo

Q. Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad ku saabsan saamaynta caafimaad ee kiimikada lead ee ku jirta biyaha la cabo?

A: Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah iyo Maamulka Caafimaadka Oregon waa hay'adaha khibrada u leh isla markaana mas'uulka ka ah ka hortagga iyo wax ka qabashada saamaynta caafimaad ee kiimikada lead. Website-ka waaxda caafimaadka www.multco/us/health/lead-poinsoning-prevention ayaa bixiya macluumaad wanaagsan iyo jawaabo ku saabsan macmuulaadka kiimikada lead. Waxaysidoo kale leeyihiin khadka loogu talagalay su'aalaha 503.988.4000.

## Qaybinta Biyaha oo Badbaado leh

Q. Waa maxay qorshaha loogu talagalay gaarsiinta biyaha inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2016-17-ka?

A. PPS waxay mishiin 5 gallon ah oo biyaha qaybiya ku rakibtay goobaha dhexe ee dugsi kasta. Dhammaan meelaha biyaha laga cabo "drinking fountains" waa la xiray ama waa la daboolay, laakiin biyaha musqushaiyo meesha wax lagu dhaqo "sinks" way furan yihiin si gacmaha loogu dhaqdo.

Q: Qoysasku caagadaha biyaha 'bottled water' ma soo raacin karaan ardaydooda?

A: Haa, laakiin PPS waxa ay waalidiinta ku dhiirigelinaysaa in ay diraan caagadaha biyaha 'bottled water' oo laga buuxsan karo meel biyaha la cabo oo badbaado leh ku jiraan oo dugsiga ka tirsan. Biyaha la cabo oo badbaado leh ayaa laga heli doonaa dugsiyada oo dhan kuwaasi oo loogu talagalay ardayda, waaxda iyo shaqaalaha dugsiga oo dhan.

## Baaritaanka Heerka Kiimikada Lead

Q. Waa maxay fursadaha ay PPS siinayso ardayda iyo shaqaalaha si ay u helaan baaritaannada kiimikada lead oo lacag la'aan ah?

A: Gu'gii la soo dhaafay iyo xagaaga oo dhan, PPS waxa ay iskaashi la yeelatay Degaanka Multnomah iyada oo qoysaskana siisay macluumaadka hadlaya baaritaannada heerka kiimikada lead Degaanka ee lacag la'aanta ah ee Portland oo dhan.

Q. Ma jiraan wax fursad o dheeraad ah oo loogu talagalay baaritaanka kiimikada lead?

A: Wakhtigan la joogo, baaritaanka kiimikada lead ee dhiiga ayaa la helayaa

ah oo ku saabsan fasalada caafimaadee soo socda adigaoo booqanaya [https://multco.us/health/lead -poisoning-prevention/test- your-child-lead](https://multco.us/health/lead-poisoning-prevention/test-your-child-lead).

Q: Halkee ayay qoysasku ka ogaan karaan waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan heerarka kiimikada lead iyo khataraha caafimaad ee ay leedahay?

A: Degaanka Multnomah ayaa hawlgeliya “khadka kiimikada lead” email ayaa loo diri karaa leadline@multco.us iyada oo khadka telefoonka ee macluumaadkana laga wici karo 503-988-4000.

## Su’aalaha Kale

Q: Sidee ayaa cuntada dugsiga loo diyaariyaa?

A: PPS waxay dhaqan-gelisay nidaam tuubooyinka biyaha dwTj0Tw [5j [(2016.019 Tc 0.019 T.)-d-34(8)-(7Tc

DRAFT

DR

DRA